



# Imtixaanka Gobolka Washington: Darajada Fasallada 3-8

Ardayda ku jirta fasallada 3-8 inta ugu badan ayaa ka qaadadan doona Qiyaasaha Horumarka Ardayda (MSP). Qiyaastii boqolkiiba hal ayaa ka qaybgali Imtixaannada Habka u Dhigma Qiyaasta Ardayda Washington (WAAS), oo barnaamij u digma midka hore oo ay galaan ardayda barnaamijka waxbarshada qaaska ah.

Magaca MSP ayaa xanbbaarsan himilada imtixaanka: Si loo qiyaaso horumarka ardayga. Imtixaanka gobolku waa inuuna noqon waxa kaliya ee xukuma xirfadaha iyo aqoonta tacliinta ardayga. Waxqabadka ardaygu siday u dhan yihiin waa in la qaddariyaa. Haddii wax su'aalo ah aad ka qabtid ilmahaaga waxbarashadiisa, fadlan la xiriir macallinka ama dugsiga ilmahaaga.

Fadlan booqo [www.WAtesting.com](http://www.WAtesting.com) si wax dheerad ah aad uga ogaato waxa ku saabsan imtixaanka gobolka.

## Imtixaamitaanka Gobolka Su'aalaha inta Badan la Warsado (FAQ)

### Waa maxay noocada su'aalood ee ku yimaad imtixaannada gobolka?

Aqriska, xisaabta iyo sayniska MSP-ga waxa ka mid ah su'aalo jawaabaha la kala doorto leh iyo su'aalaha jawaabta gaaban u baahan. Su'aalaha afarta-dhibcood la siinayey ayaa laga daayey imtixaannada akhriska, xisaabta iyo sayniska. Wax ka beddelkan ayaa u oggolaaneysa ardaydu inay muujiyaan inay karti u leeyihiin xallinta masalooyinka, iyaga oo aan marka dhibco lagu siin kartidooda qoraalka. Waxaan leenahay imtixaan MSP oo qoraal ah fasllada 4aad iyo 7aad.

Somali

# FASALKA



## Jadwalka Warbixinta iyo Imtixaanka Gobolka

**Abriil 27-Maayo 18:** Daaqadda imtixaanka MSP-ga waraaqda/qalin-rasaaska ee loogu talagalay darajo fasallo 3-8\*

**Abriil 27-Juun 4:** Mudada imtixaanka lagu qaado ee fasalada 3-8\*

**Illaa bartamaha Sebtemeber:** Dhamman warbiximaha MSP ayaa guriga loo soo dirayaa

\* Imtixaanku waa hal maalin cashar kasta markay tahay aqriska iyo xisaabta, 2 maalmood markay tahay qoraalka

## Waa maxay micnaha dhibco natiijo (score) ee MSP?

Ardayda ayaa ka hesha dhibco natiijo (score) imtixaan kasta MSP oo ay qaataan. Darajeeyntaasina waxay ku saleysan tahay sida uu ardaygu uga soo baxay imtixaankaas, sidaas la adligede kuma aad arki doontid boqolayda badanaaba aad ku aragto imtixaana kale. Darajeeyntuna waxay noqotaa mid ka mid ah xadadkaan:

- Xadka **4** **Dhaafay Xadka Gobolka:** Muujinaysaa xad sare oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.
- Xadka **3** **Soo Buuxiyay Xadka Gobolka:** Muujinaysaa xad sare oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.
- Xadka **2** **Ka hooseeya Xadka Gobolka:** Muujinaysaa qaar ka mid ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.
- Xadka **1** **Aad uga hooseeya Xadka Gobolka:** Muujinaysaa inuu bartay wax yar oo ah xirfadaha iyo aqoonta maadadaas.

## Ku Wareegga Imtixaanka Onlineka ah

Washington Maaha gobolka ugu horreeyey ee ku dhaqaaqa in imtixaan lagu qaadi intarnatka, laakiin waxay ku jirtaa hogaamiyayaasha. Ujeedada Gobolku waxa weeyaan in inta badan ee ardayda iskuulka dhexe iyo ka hoose ee waxakhriska iyo xisaabta, iyo sayniska, imtixaanka lagaga qaado dhinaca combiyuutarka ee dhamaan isguulada ka hor taariikhda 2014.

Waqtiga kuleylihu soo galayo ee 2012, imtixaanka MSP, ee fasalada 3-8, waxa lagu qaadi-doonaa intarnatka, iyada oo fasalada 3aad ay noqon-doonto markii ugu horeysay. Cilmi-baadhis ayaa lagu sameeyay sidida ay u suura-gali-karto in imtixaanka lagu qaado intarnatka, ee arrimaha la xidhiidha qoraalka fasalada 4aad illaa kuwa 7aad, ee casharada qoraalka.

## Yaa Imtixaanka Laga Qaada Iyo Goorma?

Sharciga federaalka ah ee Ilmana Ayaan laga Tagin ayaa u baahn in sannad kasta lagu imtixaanmo ardayda darajada fasallada 3-8 iyo 10 akhriska iyo xisaabta, iyo saddex darajo fasal (fasallada 5, 8 iyo 10 Washington gudaheeda). Gobolkeenu waliba waxa u ku imtixamaa ardayda qoritaanka (dajada fasallada 4, 7 iyo 10). Gobolkeena ayaa waliba u guuray dhinaca imtixamidda onlaynka.

Fasalka	3-aad	4-aad	5-aad	6-aad	7-aad	8-aad	9-aad	10-aad	11-aad	12-aad
Aqrinta	✓ ■	✓ ■	✓ ■	✓ ■	✓ ■	✓ ■	NT	✓	Loo baahan yahay kaliya haddii u ardaygu la kulmin	
Xisaabta	✓ ■	✓ ■	✓ ■	✓ ■	✓ ■	✓ ■	✓	✓	waxa looga baahan yahay qiimaynta qalin-jabinta gobolka.	
Qoritaanka		✓			✓		NT	✓		
Sayniska			✓ ■			✓ ■	✓	✓		

- Lagu bixin doono online markay tahay guga 2012
- NT Mawduuca casharka aan la imtixamin (fasalada 9aad oo kaliya ayaa qaadandoona imtixaanka dhamaadka tacliinta ee xisaabta iyo culuumta, haddii ay duruusdaa dhigtaan).



Office of Superintendent of Public Instruction  
Old Capitol Building  
P.O. Box 47200  
Olympia, WA 98504-7200

## For more information

OSPI: [www.k12.wa.us](http://www.k12.wa.us)  
MSP/HSPE: [www.WAtesting.com](http://www.WAtesting.com)  
Su'aalaha: [StateTesting@k12.wa.us](mailto:StateTesting@k12.wa.us)

August 2011